

الآداب والحقوق العامة للمجتمع وأثرها في رقيه وبناء حضارته

**Aadaabta iyo xuquuqda guud ee bulshada iyo  
saameynta ay ku leedahay horumarka iyo dhismaha  
xadaaradda**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(فَلَمَّا هَدَى رَبِّي إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ دِينًا قِيمًا مُلَّةً إِبْرَاهِيمَ حَنِيفًا وَمَا  
كَانَ مِنِ الْمُشْرِكِينَ)

(Dheh wuxuu igu hanuuniyey rabbigayga jid toosan diin sugar oo diintii (Nabi) Ibraahim isagoo toosan oon gaalada ka mid ahayn)

Waxaan qirayaan in Illaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaan in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa oo xadiiskiisa sharafta leh ku yiri:

(أَدَبِنِي رَبِّي فَأَخْسِنَ تَأْدِيبِي)

(Rabbigayga ayaa i edbiyay edbintaydana wuu hagaajiyay)

Illaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

### **Intaas kaddib:**

Islaamka wuxuu la yimid manhaj dhammeystiran, oo habaynaya xiriirka qofka xagga rabbigiisa iyo xagga dadka iyo xiriirkiiisa xagga koonka, shareecada islaamka waxaa ka buuxa nidaamyo badan iyo aadaab guud oo kaalin ka qaadanaya hormarinta bulshada iyo barwaaqadeeda.

aadaabtan waxaa ka mid ah: **idan warsashada**, islaamka wuxuu jideeyay idan warsashada, wuxuuna ka dhigay aadaabta guud ee dadka siinaysa khusuusiyad, Alle wuxuu leeyahay:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَدْخُلُوا بُيوْتًا غَيْرَ بُيوْتِكُمْ حَتَّىٰ تَسْتَأْنِسُوا وَتَسْلَمُوا  
عَلَىٰ أَهْلِهَا ذَلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ)

(Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha galina guryo aan kuwiinna ahayn Intaad ka idan warsataan kana salaantaan Ehelkooda, saasaana idiin khayr roon si aad u xusuusataan)

Nabiga wuxuu na baray idan warsashada iyo aadaabta la xiriirta, waxaa ka mid ah qofka idanka weyddiisanaya inuu salaan ku bilaabo magaciisana sheego, nin ayaa nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -

idan weyddiistay asoo guri ku jiro wuxuu yiri: masoo galaa? wuxuu ku yiri rasuulka khaadimkisa:

(اَخْرُجْ إِلَى هَذَا ، فَعَلَمْهُ الْاسْتِئْدَانَ ، فَقُلْ لَهُ : قُلْ : السَّلَامُ عَلَيْكُمْ ، أَأَدْخُلْ؟) ، فَسَمِعَهُ الرَّجُلُ ، فَقَالَ : السَّلَامُ عَلَيْكُمْ ، أَأَدْخُلْ؟ فَأَذِنَ لَهُ النَّبِيُّ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ، فَدَخَلَ

(u tagn kan soo bar idan warsashada kuna dheh: dheh: Salaam Caleykum masoo gali karaa?, ninkii ayaa maqlay wuxuu yiri: Salaam Caleykum masoo gali karaa?, nabiga wuu u idmay, marka wuu soo galay) .

وَعَنْ جَابِرِ (رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ) ، قَالَ : أَتَيْتُ النَّبِيَّ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ، فَدَقَّتُ الْبَابَ ، فَقَالَ : (مَنْ هَذَا؟) ، فَقُلْتُ : (أَنَا ، أَنَا!) ، كَانَهُ كَرِهَهَا.

Jaabir waxaa laga wariyay inuu yiri: nabiga ayaan u imid waxaanna garaacay albaabka wuxuu yiri: (**waa kuma**) waxaan iri: aniga, wuxuu yiri: (**aniga aniga!**) asoo dhibsaday oo kale.

aadaabta idan warsashada waxaa ka mid ah laabashada aragga, iyo albaabka inaan la horsitaagin, wuxuu yiri rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(إِنَّمَا جُعِلَ الْاسْتِئْدَانُ مِنْ أَجْلِ الْبَصَرِ)

(Idan warsashada waxaa loo sameeyay aragga dartiisa), Waxaa laga wariyay Sacad bin Cubaada – Ilahaay raalli haka noqdee - inuu idan warsaday asoo albaabka horjooga wuxuu ku yiri nabiga :  
**(لَا تَسْتَأْذِنْ وَأَنْتَ مُسْتَقْبِلُ الْبَابِ)**

**(Idan ha warsanin adoo albaabka hor taagan).**

Waxaa soo arooray in nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - uu ahaa haddii albaab uu tago oo uu rabo inuu idan warsado ma hor istaagi jirin, wuxuu imaan jiray midig ama bidix, haddii loo idmo wuu galaa haddii kalena wuu tagaa, aadaabta guud oo islaamka ku boorriyay waxaa ka mid ah: **aadaabta waddada** iyo meelaha dadka ka dhexeeya, islaamka jidka xaq ayuu siiyay oo ay habboon tahay in la guto, wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee :-:

**(إِيَّاكُمْ وَالْجُلوْسَ فِي الطُّرُقَاتِ) ، قَالُوا : يَا رَسُولَ اللَّهِ ، مَا لَنَا بُدُّ مِنْ مَجَالِسِنَا ، نَتَحَدَّثُ فِيهَا ، قَالَ رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) : (فَإِذَا أَبِيْتُمْ إِلَّا الْمَجْلِسَ فَاعْطُوَا الطَّرِيقَ حَقَّهُ) ، قَالُوا : وَمَا حَقُّهُ ؟ قَالَ : (غُصْنُ الْبَصَرِ ، وَكُفُّ الْأَذَى ، وَرَدُّ السَّلَامِ ، وَالْأَمْرُ بِالْمَعْرُوفِ وَنَهْيُ عَنِ الْمُنْكَرِ)**

**(Iska jira inaad fariisataan jidadka, waxay dheheen rasuulkii allow kama maarmi karno, waan ku sheekeysanaa, wuxuu yiri rasuulka: (haddii aad**

diiddeen inaad fariisataan mooyee siiya jidka xaqiisa, waxay dhaheen waa maxay xaqiisa wuxuu yiri :( laabashada aragga, joojinta dhibka, jawaabta salaanta, faridda wanaagga iyo reebidda xumaanta), wuxuu leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(الإِيمَانُ يَضْعُ وَسَبْعُونَ، أَوْ يَضْعُ وَسِتُّونَ شُعْبَةً، فَأَفْضَلُهَا قَوْلُ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، وَأَدْنَاهَا إِمَاطَةُ الْأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ، وَالْحَيَاةُ شُعْبَةٌ مِّنَ الْإِيمَانِ)

(limaanka waa toddobaatan iyo dhowr ama lixdan iyo dhowr qeyb, waxaa ugu fiican oraahda laa ilaaha illallaah, waxaana ugu hooseya in jidka qashinka laga leexiyo, xishoodkana waa qeyb iimaanka ka mid ah).

waxaa ku habboon qofka adeegsanaya waddada ama meelaha dadka ka dhexeeya inuusan codkiisa dheereynin, ama inuusan ku sheekeysanin cod dadka dhibaya ama mid dheer, iyo inuusan si xun u qoslin, inuusan qurun ku tuurin waddada, waa inuu ku ridaa meelaha loogu talaggalay, waxaa laga rabaa inuu qashinka waddada ka qaado, sidoo kale waxaa laga rabaa inuusan waddada qalalaaso gelinin, dadka marayana inuusan ku dhabin fiiro iyo qashqashaad hadal

ama gacan ah, aadaabta guud waxaa ka mid ah:  
**nadaafada**, islaamka wuxuu ka dhigay daхаарада iyo  
nadaafada dhammeystiran ee jirka iyo marada iyo  
goobta qeyb ka mid ah shareecada, si ku habboon  
ahamiyadeeda dhaqan ahaan ama qiimo dhaqameed,  
sidaas awgeed islaamka wuxuu ku boorriyay qeyb  
aadaabta ka mid ah oo ka dhegeysa qofka mid fiican oo  
aan dadka ka dideynin, Ilaahay wuxuu ammaanay  
mu'miniinta ku dadaala nadaafadda jirkooda,  
nadaafadda bannaankooda iyo gudahooda, wuxuu yiri  
Alle - subxaanahu :-

(إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ التَّوَابِينَ وَيُحِبُّ الْمُتَطَهِّرِينَ)

**(Alle wuxuu jecel yahay kuwa towbad keenka badan  
wuxuuna jecel yahay kuwa is dahiriya)**

wuxuu yiri rasuulka:

(إِنَّ اللَّهَ طِيبٌ يُحِبُّ الطَّيِّبَ ، نَظِيفٌ يُحِبُّ النَّظَافَةَ ...)

**(Ilaahay waa wanaagsan yahay wuxuuna jecel yahay  
wanaagga, waa nadiif nadaafaddana wuu jecel  
yahay...)** wuxuu leeyahay:

**(dahaarada waa iimaanka barkii...)**, wuxuu arkay  
nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -  
nin tintiisa wasakh ah oon shanlaysnayn wuxuu yiri:

(أَمَا كَانَ هَذَا يَجْدُ مَا يُسْكُنُ بِهِ شَعْرَةً؟)

^

(kan ma helin miyaa wax tintiisa uu ku hagaajiyo?),  
nin kale ayuu arkay oo xiran dhar aan nadiif ahayn,  
wuxuu ku yiri:

(أَمَا كَانَ هَذَا يَجُدُّ مَا يَغْسِلُ بِهِ ثُوبَةٌ؟)

(kan ma helin miyaa wax dharkiisa uu ku dhaqdo?)

Sidoo kale wuxuu ku boorriyay nabiga - naxariis iyo  
nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - nadaafadda ilkaha,  
asoo ku dadaalaya afka caraf inuu noqdo, qofkana  
inuusan ku dhibin walaalkiisa ur kaste qurmuun oo  
dadka didiya, wuxuu leeyahay rasuulka:  
(لَوْلَا أَنْ أَشْقَى عَلَى أَمَّتِي - أَوْ عَلَى النَّاسِ - لَأَمْرَتُهُمْ بِالسُّوَاقِ مَعَ كُلِّ صَلَاةٍ)

(Haddaanan dhibi lahayn ummadayda – ama dadka –  
waxaan fari lahaa caday salaad kaste)

aadaabta guud waxaa ka mid ah : aadaabta wada  
**hadalka**, wuxuu ka mid yahay wada hadalka waxyaalaha  
laysku barto qaladkana lagu saxo, islaamka wuxuu u  
furay albaabka wada hadalka dadkoo dhan, sidii loo  
gaaro hanuunka iyo xaqqa iyadoon dhib jirin laakin  
wada hadalka waxaa la rabaa inuu ka dheeraado durid  
iyo jeesjees ama yasitaan, wuxuu yiri Alle:

(وَجَادِلُهُمْ بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ)

**(Kulana dood si u fiican)**

wuxuu leeyahay Alle:

(وَقُلْ لِعِبَادِي يَقُولُوا إِنَّمَا الَّتِي هِيَ أَحْسَنُ...)

(ku dheh Addoomadayda ha dheheen sida u fiican...)  
nabigeena wuxuu leeyahay:

(لَيْسَ الْمُؤْمِنُ بِالْطَّعَانِ وَلَا اللَّعَانِ وَلَا الْفَاحِشِ وَلَا الْبَذِيءُ)

(Mu'minka ma aha mid durid badan ama lacnad  
badan ama xun ama afxun), waxaa habboon wada  
hadalka inuu wanaag ku dhisnaado, aqoonna ku  
salaysan yahay iyo mowduuciyad, iyo tixgalinta xaaladda  
Waxaa ka mid ah: **in warka la hubsado** soo guurinta  
kahor, wuxuu yiri Alle:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنْ جَاءَكُمْ فَاسِقٌ يَتَبَيَّنُ أَنْ ثُصِيبُوا قَوْمًا  
بِجَهَالَةٍ فَتُصْبِحُوا عَلَىٰ مَا فَعَلْنَاهُمْ نَادِمِينَ)

(Kuwa xaqa rumeyow hadduu idiiinla yimaaddo  
faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho  
la'aan, markaasna aad ka shallaydaan waxaad  
fasheen), wuxuu leeyahay rasuulka:

(الثَّالِثُ مِنَ اللَّهِ ، وَالْعَجْلَةُ مِنَ الشَّيْطَانِ)

(Deganaanta waa xagga Alle degdeggana waa xagga  
shaydaanka), wuxuu leeyahaya:

(الْتَّوَدَّةُ فِي كُلِّ شَيْءٍ إِلَّا فِي عَمَلِ الْآخِرَةِ)

(Xasilloonida wax kaste ayay ku jirtaa camalka  
aakhiro waxan ahayn), wuxuu leeyahay rasuulka:

(كَفَىٰ بِالْمَرْءِ كَذِبًا أَنْ يُحَدِّثَ بِكُلِّ مَا سَمِعَ)

(Qofka been waxaa ku filan inuu sheego wax kaste  
uu maqlay) waxaa ka mid ah: inaan la sheegsheegin ama

la tiimbanin barobogaandada, maxaayeelay sheegsheegiddeeda waxay keenaysaa inay faafsto, borobogaandada way faaftaa marka loo helo afaf sheegsheegaya ama dhego maqlaya ama naf qaadanaysa oona rummeynaysa, wuxuu yiri Alle:

(إِذْ تَلْقَوْنَاهُ بِالْسِنَتِكُمْ وَتَقُولُونَ بِأَفْوَاهِكُمْ مَا لَيْسَ لَكُمْ بِهِ عِلْمٌ وَتَحْسِبُونَهُ  
هَيْنَا وَهُوَ عِنْدَ اللَّهِ عَظِيمٌ)

(Markaad kula kulmaysaan qadafka carrabkiinna oo aad ku dhahaysaan afkiinna waxaydaan ogayn, una malaynaysaan wax fudud isagoo Alle agtiisa ku wayn) wuxuu leeyahay rasuulka :

(مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلَا يُؤْذِنُ جَارَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ  
وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلَيُكْرِمْ صَنِيفَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلَيُقْرَنَ خَيْرًا  
أَوْ لِيَصُمُّثْ)

(Qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro yuuna dhibin deriskiisa , qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakkhiro martidiisa ha karaameeyo, qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro wanaag ha sheego ama ha iska ammuso).

Aadaabta guud ee islaamka la yimid waxaa ka mid ah: **gaabinta codka**, waxaa laga wadaa inuusan qofka ka dheereynin codkiisa inta caadiga ah gaar ahaan markuu la joogo qof isaga ka sarreeya darjo ahaan, waxaa ku soo

arooray dardaaranka Luqmaan Alxakiim ee oraahda Alle lagu sheegay:

(وَاقْصِدْ فِي مَشْيَكَ وَاغْضُضْ مِنْ صَوْتِكَ إِنَّ أَنْكَرَ الْأَصْوَاتِ لَصَوْتِ  
الْحَمِيرِ)

(Socodkaagana ku dhexdhexayso, hoosna u dhig codkaaga, cod waxaa ugu xun codka dameerahee.)

Ilaahay wuxuu ammaanay kuwa gaabiya codkooda gaar ahaan marka ay rasuulka la joogaan wuxuu yiri:

(إِنَّ الَّذِينَ يَغْضُبُونَ أَصْوَاتُهُمْ عِنْدَ رَسُولِ اللَّهِ أُولَئِكَ الَّذِينَ امْتَحَنَ اللَّهُ  
قُلُوبَهُمْ لِلتَّقْوَى لَهُمْ مَغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ)

(kuwa codkooda hoos u dhiga Rasuulka agtiisa kuwaasi waa kuwo Alle imtixaanay quluubtooda dhawrsasho darteed, waxayna mudanyihiiin dambi dhaaf iyo ajri wayn).

Aadaabta guud ee islaamka la yimid waxaa ka mid ah:  
**hanuuninta qofka lunsan:** waxaa laga wadaa in wax loo tilmaamo ama qof hago la raaciyo. wuxuu yiri rasuulkla:

(إِيَاكُمْ وَالْجُلُوسُ عَلَى الْطُرُقَاتِ فَقَالُوا: يَا رَسُولَ اللَّهِ مَا لَنَا بِدِنْ من  
مَجَالِسِنَا نَتَحَدَّثُ فِيهَا . قَالَ: فَإِنَّمَا إِذَا أَبَيْتُمْ فَاعْطُوَا الطَّرِيقَ حَقَّهُ . قَالُوا :  
وَمَا حَقُّهُ ؟ قَالَ: غَضْبُ الْبَصَرِ ، وَكَفُّ الْأَذْى ، وَرَدُّ السَّلَامِ ، وَالْأَمْرُ  
بِالْمَعْرُوفِ وَنَهْيُ عَنِ الْمُنْكَرِ ، وَإِرْشَادُ الضَّالِّ).

(Iska jira inaad fariisataan jidodka, waxay dheheen  
rasuulkii allow kama maarmi karno, waan ku  
sheekeysanaa, wuxuu yiri rasuulka: (haddii aad  
diiddeen inaad fariisataan mooyee siiya jidka xaqiisa,  
waxay dhaheen waa maxay xaqiisa wuxuu yiri :(  
laabashada aragga, joojinta dhibka, jawaabta salaanta,  
faridda wanaagga iyo reebidda xumaanta iyo  
hanuuninta qofka lunsan)

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay  
ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

\*\*\*

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qiraya in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qiraya in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

### **Walaalaha islaamka ahow:**

Waxaa kaloo jira aadaab guud muhim ah oo laga rabo qofka muslinka inuu qaato, waxaa ka mid ah: **qofka dhibban in loo gurmado**, islaamka wuxuu ku tiriay camalka kan ugu fiican Abuu thar – Ilaahay raalli haka noqdee - waxaa laga wariyay inuu yiri rasuulka:

(لَيْسَ مِنْ نَفْسِ ابْنِ آدَمَ إِلَّا عَلَيْهَا صَدَقَةٌ فِي كُلِّ يَوْمٍ طَلَعَتْ فِيهِ الشَّمْسُ، قِيلَ: يَا رَسُولَ اللَّهِ وَمِنْ أَيْنَ لَنَا صَدَقَةٌ نَتَصَدَّقُ بِهَا؟ فَقَالَ: إِنَّ أَبْوَابَ الْخَيْرِ لَكَثِيرَةٌ: التَّسْبِيحُ وَالتَّحْمِيدُ وَالتَّكْبِيرُ وَالتَّهْلِيلُ وَالْأَمْرُ بِالْمَعْرُوفِ وَنَهْيُ عَنِ الْمُنْكَرِ، وَتُمْبِطُ الْأَذى عَنِ الطَّرِيقِ، وَتُسَمِّعُ الْأَصْمَمَ، وَتَهْدِي الْأَعْمَمَ، وَتَدْلِلُ الْمُسْتَدِلَّ عَلَى حَاجَتِهِ وَتَسْعَى بِشَدَّةِ

**ساقِيَكَ مَعَ الْلَّهَفَانِ الْمُسْتَغِيثِ وَتَحْمِلُ بِشَدَّةِ ذِرَاعِيَّكَ مَعَ الْضَّعِيفِ  
فَهَذَا كُلُّهُ صَدَقَةٌ مِنْكَ عَلَى نَفْسِكَ (صَحِيحُ ابْنِ حَبَّانَ)**

(naf aadane ma jirto aan sadaqo laga rabin maalin kaste ay qorrxada soo baxdo, waxaa la yiri: Rasuulkii Allow halkeen ka keenaynaa sadaqo aan bixino Wuxuu yiri: albaabada khayrka way badan yihiin: tasbiixda waa sadaqo mahadda waa sadaqo takbiirta waa sadaqo tahliisha waa sadaqo, reebidda xumaanta waa sadaqo inaad jidka dhibka ka leexiso waa sadaqo inaad fahansiiso dhogoolaha waa sadaqo inaad hanuuniso indhoolaha waa sadaqo, inaad tusto midka rabo in xaajadiisa la tuso iyo inaad u degdegto qofka dhibban oo gargaarka u baahan oo aad ku xambaarto awoodda gacmahaaga midka tabarta yar waxaanoo dhan, waa sadaqo oo aad naftaada ku **sadaqeysanayso**) (saxiix bin xabaabaan), waxaa ka mid ah: in loo kaalmeeyo dadka danta yar iyo dadka baahida gaar ah qaba, maxaa yeelay isdhammaystirka bulshada waxaa dan ugu jirto hantiilaha intaan la gaarin saboolka, si loo helo nolol isku dheellitiran, ayadoo laga shidaalqaadanayo oraahda imaam Cali – Ilaahay raalli haka noqdee - "Ilaahay xoolaha hantiileyaasha wuxuu ku waajibiyay quudka dadka saboolka ah, qof faqir ah uma gaajoodo qof hantiile bakhaylnimadiisa darteeda mooyee" daryeelkan waxaa lagu daraa keydka dalka in

la daryeelo dadka danta yar waana xaq iyo waajib dusha ka saaran bulshada, Alle wuxuu u dhow yahay dadka qalbiga ka jabay, wuxuuna u naxariisanayaad dadka addoomihiisa u naxariista, mana yaso khayr, xitaa hadduu yahay hadal wanaagsan wuxuu leeyahay rasuulka:

(لا تحرّن من المعرفة شيئاً، ولو أن تلقي أخاك بوجه طلق)  
**(Wanaagga ha yasin xitaa haddii aad kula kulanto walaalkaaga weji furfuran)**, wuxuu leeyahay:

(وهل تتصرون وثربون إلا بضعفائكم؟!) (والله في عون العبد ما كان العبد في عون أخيه)

**(Miyaa laydinku gargaarayaa kuwiina tabarta yar mooyee)**

**(Addoonka wuxuu ku sugan yahay gargaarka Alle intuu u gargaarayo walaalkiisa)**

**Waxaa ka mid ah: weyneyn ta qofka da'da ah, in kor loo qaado oo loo dhimriyo oo aan lagu xadgudbin, waa inuu eegaa da'diisa iyo horreyntiisa islaamka iyo inuu u garto qiimihiisa iyo darajiisa, qofka weynna waxaa la faray kan yar inuu u naxariisto oo uu dhimriyo wuxuu leeyahay rasuulka:**

**(ما من مسلم يكرِّم ذا الشَّيْبَةَ؛ إِلَّا قَيَضَ اللَّهُ لَهُ مِنْ يَكْرِمَهُ فِي سِنَّهِ)**

(muslin ma jiro oo sharfaya qof cirroole ah hadday dhacdo Ilaahay wuxuu u diyaarinayaa qof sharfaya markuu **weynado**), waxay ka mid tahay muuqaallada weynida islaamka iyo naxariistiisa iyo sahlanaantiisa iyo garsoorkiisa, iyo ku dadaalka uu ku dadaalo karaameynta aadanaha, wuxuu ka dhigay rasuulka in edeb lagula dhaqmo cirroolaha iyo qofka quraanka xafidsan iyo xaakimka caadilka ah qaab ka mid ah qaababka Ilaalay lagu weyneeyo, wuxuu leeyahay nabigeena:

(إِنَّ مِنْ إِجْلَالِ اللَّهِ إِكْرَامَ ذِي الشَّيْبَةِ الْمُسْلِمِ ، وَحَامِلِ الْقُرْآنِ عَيْرُ الْغَالِي  
فِيهِ وَالْجَافِي عَنْهُ ، وَإِكْرَامَ ذِي السُّلْطَانِ الْمُفْسِطِ)

(Weyneynta Ilaahay waxaa ka mid ah cirroolaha muslinka in la karaameeyo iyo qofka quraanka xambaarsan oo aan ku xadgudbin aanna ka fogeyn iyo in la karaameeyo qofka xaakimka caadilka ah), wuxuu leeyahay nabiga:

(لَيْسَ مِنَّا مَنْ لَمْ يَرْحَمْ صَغِيرَنَا ، وَيُوَقِّرْ كَبِيرَنَا ، وَيَأْمُرُ بِالْمَعْرُوفِ ،  
وَيَنْهَا عَنِ الْمُنْكَرِ)

(Naga mid ma aha qofka aan u naxariisanin keena yar aanna weyneynin keena weyn, wanaagna aan farin xumaanna aan reebin)

fahanka saxa ah ee islaamka samaaxadiisa waa inaysan shardi ahayn inuu ahaado cirroolaha muslin, waxaa soo arooraray inuu nabiga ku sadaqaystay dad

yahuud ah, wuxuu u qorayay cumar bin cabdil caziiz duqa magaalada basra : "eeg xaggaaga dadka ahlu thimmaha qofka da'diiisu weynaatay tabar beelay oo shaqo waayay lacag wax u qabanayso ka sii beytulmaalka muslimiinta", xaqqa ay bulshada dadkeeda ku leedahay waxaa ka mid ah inay ilaaliyaan maslaxadda guud, tusaale haddaan usoo qaadano badashada dadka, labo arrin ayaan adkeynaynaa: **midda koowaad:** dadka qaar naftooda kaliya ayay eegaan hadday hanti leeyihiin, awoodda ma aha awood lacag kaliya, ee waa awood lacag iyo mid tarbiyo iyo wixii soo galaya daryeel iyo ilaalo, mana aha awood fardi ah, ee waa awood u gudbaysa dowladaha inay siiyan adeegyo oo aysan keensan karin dadka, marka waa in la eegaa awoodda dowladda inay tahay, waxyaalaha ugu muhimsan oo qofka uu ku xisaabtamo xagga deegaanka, nolol ma mudanayo qofka loo dhalay naftiisa kaliya, badashada dadka aan habaysnayn qofka ama familka keliya ma dhibayso, ee waxay dhib u keenaysaa dowladaha aan xallin karin badashada, ciriiriga iyo barwaaqada laguma qiyaaso qadiyadan qiyaaska dadka iyadoo aan la eegeynin dowladaha iyo awoodda ay u leeyihiin.

**midda labaad:** dad yar oo awood leh ayaan ka khayr badan dad badan oo daciif ah, kuwaasoo nabiga ku tilmaamay inay yihiin daadxoor oo kale, maxaayeelay

duruufaha ay marayaan dowlaha qaar awood uma laha inay siiyaan dadka waxyaalaha asaasiga ah xagga caafimaadka iyo waxbarashada iyo dhismaha hoose, marka ay dadka badan yihiin, waxay keenaysaa dadka badan inay noqdaan sida daadxoor oo kale, qof kastoo wax garad ah wuxuu ogaanaa marka ay iska hor yimaadaan tiro iyo tayo inay fiican tahay tayada, dadka yar oo awoodda leh waxay ka fiican yihiin dadka badan oo taagta yar kun jeer, maxaayeelay badnaanta (qaldan) oo keenaysa diciifnimo iyo jaahilnimo iyo dibudhac taasoo noqonaysa culays adag oo aan la xamili karin ama dowlada aysan awoodin, waa badnaanta nabiga ku tilmaamay inay tahay daadxoor wax faa'ido ma laha, waa badnaan dhib leh aan waxtar lahayn.

**Ilaahayow nagu hanuuni akhlaaqd+`loa midda ugu  
wanaagsan, kuma hanuuniyo qofaan adiga ahayn,  
nagana leexi middeeda xun kamana leexiyo middeeda  
xun qofaan adiga ahayn, nagana mid yeel  
addoomahaaga mukhlisiinta ah.**

